Xus loo sameeyay 31'kii May oo xalay ka dhacday Hargysa

(Jun 01, 2008 at 11:11 AM) - Contributed by Qarannews - Last Updated (Jun 01, 2008 at 03:48 PM)

Hargeysa (Qarannews)- Munaasibadan xalay lagu xusayey gud-galkii SNM Caasimada Somaliland ee Hargeysa kaas oo ay kaga saareen ciidankii ugu xooga badnaa Geeska Afrika Maxamed Siyaad Barre, oo lagu qabtay Hotel Imperial ee magaalada Hargeysa.

Xafladan oo ahayd mid aad u ballaadhan oo ay soo qaban qaabiyeen ururka dhalinyaradda Afgarad oo ah urur ay ku bahoobeen dhalinyaro reer Somaliland'ahi,

Waxaana xuskan xalay ka soo qaybgalay masuuliyiin tiro badan oo ay ka mid yihiin Siyaasiyiin, Culimo awdiin, Xildhibaano, saraakiishii hogaaminaysay dagaalkan iyo marti sharef kale.

Ugu horeyntii waxaa halkaa hadal ka soo jeediyey Gudoomiyaha Xisbiga Mucaaridka ee kulmiye,Md Axmed Maxamed Maxamuuud "Siilaanyo" waxaanu ka hadlay in SNM xukunka ay wareejisay ay ku heshiisay shirkii baligubadle

"Xalaadda aynu maanta ku jirno waynu ognahay, aynu mid ogaano, waxaa Somaliya ka socda waynu ognahay, somalilad waxay dalku noqotay,dadbaa yidhaahda wareejintii xukunkii SNM ducfi bay ahayd, laakiin waxaan idiin sheegayaa shirkii ugu danbeeyey ee Bali-gubadle lagu go'aansaday laba sanno markaanu xukunka hayno dadka ayeynu ku wareejinaynaa ma khalad bay ahayd mise sax?

Mudane Siilaanyo waxaa uu intaa uu raaciyey "Annigu waxaan aaminsanahay oo aan goob walba ka idhaahdaa in aynaan gaadhin illaahayna inama gaadhsiiyo, weligeena yeynaan gaadhin meesha aynu u baahano in aynu dalkeena dagaal iyo xabad ku xorreyno,

waxanu u baahan nahay in aynu ilaashano dimuqraadiyada iyo horumarka oo aynu ka ilaalino nidaam kasta oo inoo yimaada SNM ha ahaadaan imika kuwa imika joogee, dadka qaar baa naga na yidhaahda miyaad dagaalantaan, qaarna waxay yidhaahdaan kursi baad ku imaan la'dihiin oo aad daba yaacaysaan. Waar miyaanay labadaa wax u dhexeeyaa jirin, kuraasna ku carari mayno, cid weliba xaq bay u leedahay, waxanu leenahay aanu xaqa, midhihii halganka dhalay dimuqraadiyada, Nabadgelyada iyo wadajirka u hiilino".

Gudoomiyuhu waxaa uu aad ugu dheeraaday marxaladihii kala duwanaa ee uu soo maray halgankii qadhaadhaa ee dalkan lagu xoreeyey waxaanu xusay in xitaa ay gaadhay in ay heshiiyaan labadii dawladood ee ay kala hogaaminayeen, Siyaad Barre iyo Migest Xaylo Maryan. Balse aanay arintaasi waxba u dhimin halgankaas.

Sid oo kalena waxaa isna halkaa ka hadlay Gudoomiye ku Xigeenka 1aad ee xisbiga kulmiye kana mid ahaa saraakiishii hogaaminaysay dagaalkii hargeysa ku qabsatay SNM Muuse Biixi Cabdi waxaanu ku bilaabay hadalkiisii "waxaynu u dagaalamaynay inaynu helno dawlad laga nasto tii afwayne lama hayo, Somali dagaalkii iyo jabkii ay gashay guud ahaan inagaa ugu roon, inaguna shaqo ma hayno oo dadkii shaqo la'aan ayuu u dhimanayaa, dhaqaale ma hayno, caafimaad ma hayno, oo waxyaalo badan ma hayno, laakiin waa dhibaato u baahan halgan kale oo horumarineed"

Muuse Biixi waxaa uu intaas ku daray " Markaa dad niyad jabsan markaad aragto, oo qaarbaa markay cadhoodaan waxay yidhaahdaan halgankii wuu khasaaray, taa anigu khalad ayaan u arkaa, wixii khaldan waa inaynu saxnaa haduu maamulku xun yahayna inaga ayey inoo taalaa hagaajintiisu waana arin caama

Haddii aynu guushii hore u gaadhnay laakiin midhihii guushu inagu daaheen samir iyo adkeysi ayeynu u baahan nahayHalganku wuu soconayaa hala adkeysto",

Xidhibaan Maxamed Nuur Carraale (Duur) oo ka tirsan Mudanayaasha Golaha Wakiilada ayaa soo jeediyey in lagama maarmaan ay tahay in taariikhdii SNM la qoro si jiilasha soo socdaa ay ogaadaan wixii soo maray wadankan isaga oo amuurtaa ka hadlayaa waxaa uu yidhi

"Da'yartu waxay u baahan yihiin in taariikhdaasi habeen meel la isugu yimaado ka qiimo badane, taariikhdani wixii ay lahayd bannaanka la soo dhigo oo ay iyagu [Dhalinyaradu] ka faa'idaystaan. Laba uun baana ka muuqan lahaa, waxa ka muuqan lahaa taariikhdaasi gol-dalooladii ay lahayd oo u baahan in maanta la saxo oo laga baydho, waayo taariikh kasta oo dhacdaa waa dahab maaha iyo wanaagii ay lahayd oo lagu daydo".

Waxaan idhaahdaa tallow jiilasha dambe maxaa u noqon doona inay gol-dalooladooda saxaa, oo sideebaa loo heli karaa hogaan ka badheedha gefkiisa oo garta, oo bulshada hor gala, oo aan dadka looga dhigin hadba waxay ku sheekaysanayaan in looga dhigo siyaasad iyo hogaan".

Xildhibaan Duur waxaa uu sheegay in aan maanta cid wax horumar ah oo ay u abuurtay ardayda maalin walba ka soo baxaysa jaamacadaha wadan aanay jirin isaga oo sharaad ka bixinayana sidan ayey ahayd "waxa ii muuqata in ay waxoogaa dhibaato ahi ay jirto da'yartii, Aqoontii, Waxbarashadii. Iwm. Midna aan la kobcin, dabadeed-na hogaankeena aynu ka weynay wax meel dheer inoo tilmaama, waxa maanta ka soo baxaya jaamacada arday badan, dalkii weynu

joognaa horumar looma abuurin"

Gudoomiyaha Xisbiga UCID ee Gobolka Hargeysa Xasan suldaan Cabdiraxmaan oo isaguna halkaa ka hadlay ayaa sheegay in aan taariikhda Somaliland iyo halgankii ay u soo gashay SNM dalka in aan sideedii loo xusin waxaanu yidhi "Dad aan taariikhdii SNM waxba ku lahayn ayaa ilaahay hogaankii dalkan gacanta u geliyey, waana nasiib-darro taasi, illaahayna waxanu ka rajaynaynaa in uu si deg deg ah inoo dhaafiyo".

Mr Suldaan waxaa uu intaa raaciyey "Waxaan soo jeedinayaa in guddi loo soo saaro inta ay maanta nool yihiin Muj. Axmed-Siilaanyo, muuse, Xasan Ciise-iyo cidii kale ee goobjooga ka ahayd taariikhdaa, waa in wax la qoro, oo inta xogogaalka ahna wax laga qoro, taariikhdaasina la kala dhaxlo oo ay sooyaal ahaato. Waxaynu maqlaynaa manaahijteenii baa laga saaray, laga saari maayo manaahijdka".

Baashe Cabdi Gaboobe oo ka tirsan urur siyaasadeedka Qaran oo ka soo qaybgalay xafladan ayaa sheegay in dadka reer somaliland aanay ahayn dad ku fiican ilaalinta taariikhda waxaanu yidhi "Dhaliisha dadkeenu waxa weeye waxaynu nahay dad aan taariikhda ciseyn oo aan ka faa'ideysan khaladkii soo maray, taasina waxay keentay in khaladku mar walba soo noqdo. Dad baa beryahan"

Md Baashe waxaa uu intaas ku daray " annaga (Qaran) dadbaana yidhaahda waad aamusteen ee maxaad u hadli weydeen, waxanu u aamusnay sida dadka oo dhami u aamusay, Madaxweynihii wakhtigii baa ka dhamaaday, Guurtidii wakhtidii baa ka dhamaaday, Goleyaashii Deegaanka wakhtigii baa ka dhamaaday. Markaa waxanu ka hadalnaaba ma yaalaan. Mida labaad waxa jiray wada hadalo u socday xukuumada iyo xisbiyada mucaaridka, sidaa darteed waxanu is-nidhi haka qarsha-qarsheynina wada hadalada inta ay ku heshiinayaan"

Baashe Cabdi Gaboobe waxaa uu hadalkiisii ku gunaanaday "Qoladan maamulka haysa berigii hore waxay ugu necbaayeen xisbiga, balse waxay ka sii necbaadeen markii qaran soo baxday, markaa waxanu leenahay xisbiyadow maamulka maanta jira iska jira, waad is-qarsateene, bal dibada u soo baxa oo haddii ay idin dagayaan aanu idinku kordhinee ka soo baxa mugdiga".

Sheekh Aadan Xaaji Maxamuud Xiiray (Sheekh Aadan Siiro), oo isna Munaasibadasi ka hadlay, ayaa sheegay inannay haboonayn in la kala sheegto halgankii SNM, dalka ku xoraysay, waxa kale oo uu xusay in Somaliland cadow badan leedahay oo marka laga hadlaayo qadiyada Somaliland, aan la soo dhaafin Somalilandnimada, isagoo arintaasi ka hadlayana waxa uu yidh "horta waxaan odhan lahaa halgankii yaan la kala sheeganin, Umadu runtii hawiyad (wax dadka dhaxeeya) bay lahayd, nidaamka maanta Dunida ka taliya iyo taariikhda wanaagsani ee aynu ku abtirsino ee taariikhda Islaamka ah, halganadu meel bay kaga xardhan yihiin, maanta Somaliland hadaynu nahay waxaynu leenahay Cadow badan, waxa dulmo inaga galay dadkii muslimiinta ahaa ee aynu diinta wadaagaynay ee ay Carabtu ugu horaysu, waxa dulmiga inaga gallay nimankii dunida Hogaaminayay, oo halgankeenii iyo xoriyadeenii qiimayn waayay oo ilaa maanta inaga oo intaa qaylinayna ina ictiraafin, waxa ina dulmiyay kuwii aynu wadda dhalanay ee Magaca wayni inaga dhaxeeyay oo qiimayn waayay halgankii SNM wadankan u soo gashay, waxa aan dhagaystay Cali Mahdi oo ka hadlayay Dowladii ugu horaysay, halgankii Soomaliya lagu xoreeyay waxa uu ka soo bilaabmay Goboladda Dhexe" sidoo kale waxa uu xusay inuu aaminsanyahay in maamuladii kala duwanaa e dalka soo maray ay dhamaantood ka soo jeedaan SNM "Anigu waxaan qabaa Dowlada Maanta jirta SNM-baa keentay hogaaanka Maanata dalka jirana SNM baa keentay baan qabaa, kuwii ka horeyay iyo kuwa ka danbayn doonaba SNM baa keentay baan qabaa, waxaan anigu odhan lahaa yaan la kala sheegamn halgankii, isa saxeenino Somaliland yaanu ka soo dagin, Somaliland cadow badan ayay leedahay"

Ugu danbaynta waxa isna halkaa ka hadalay Guddoomiyaha Ururka dhalinyarada ee AFGARAD, oo isagu soo abuulay Xafladan, Sheekh Maxamed Xuseen Dhabeeye, waxaanu tilmamay in loo baahan yahay halgankii Dib u xoraynta dalka iyo mujaahidiintii SNM loo sameeyo hab maamuus lagu xusayo ayaamaha Qaaliga ah ee ay muddan in la xuso lana xasuusto halgankoodii taariikhiga ahaa, waxaana hadaladiisii ku bilaabay sidan "Ururka Afgarad oo ay ku bahoobeen dhalinyaro reer Somaliland oo kacaantay ama tisqaaday cahdigii xoriyadda Somaliland ee ka danbaysay xiligii xoogaga SNM ay gulufka colaadeed ku soo qaadeen magaalooyinka waa wayn ee Somaliland.

Waxaanu runtii aragnay oo aanu dareenay maadaama oo intayada badani aanu ahayn xiligaa kaalin ka qaatay hawshaas oo iyagu qaybka galay waxaanu isku xil qaadnay in aan anagu xusno, dadka reer Somaliland xusuusino dhacdooyinkii taariikhiga ahaa ee ururkii xaq u dirirka ahi uu ka sameeyey ama uu ku soo kordhiyey taariikhda dunida.

Waxaanu doonaynaa in dadka reer Somaliland haday yihiin masuuliyiinta, culimadda iyo waxgaradka reer Somaliland inay si xoogleh u dareemaan xoriyadda Somaliland taas oo aan ku iman arin dhib yar ooh hawl wayn loo soo maray oo ay runtii ku timid dagaal iyada oo aynu la wada socono markii dalkeenu xoriyadii ugu horeysay uu helay ay si dhibyar u luntay oo aynu ku darsanay koonfurta somaliya markii danbana tabashooyin badan darteed ay ururka SNM halgan dheer u soo mareen kaas oo gaystay khasaare naf iyo maalba leh"

Source Qarannews